



UJEEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"

Maanta oo ay tariikhdu tahay 08/06/2024 Anigoo ah Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Lehna Nootaayo Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa xafiiskeeyga iigu yimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos Ku Xusan:-

WAKIILKA DHAXALTOOYADA AHNA IIBIYAHA :- IBRAAHIM MAXAMED SALAAD, Hooyo Ambiyo Cabdiwahaab Muuse, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1967, Degan Muqdisho, Sita Somali Passport P00918148	IIBSATO:- Ijaabo Maxamed C/raxmaan Maxamed, Somali ah, Hooyo: Faadumo Nuur Ducaale, Ku Dhalatay: Qoryooley Sanadkii:1984, Degan Muqdisho
TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO Dhul Banaan oo Ku yaal: Gobolka SH/Hoose, Degmada: (Afgooye Gaar ahaan Deegaanka Jaziira), Cabirka: (20X20 -M, Looto No: 8750-G W.M.L: 57163/2015] Tr:01/02/2015 kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble	SOOHDINTA DHULKA Bari: Jid, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Dhul dad QIIMAHA DHULKA: USD \$10,000 (Toban Kun Oo Doolarka Mareykanka ah).
ASALKII HORE: Xasan Maxamed Jimcaale RL:- 05904, Tr. 06/10/2014, Sabarlog Lr:03/05901/2014, Tr:09/10/2014, Kana Soo Wada Baxeen D/Hoose ee Afgooye Cabirka (40X80)-M Looto No 8746 ilaa 8753-G	

B - Aniga oo ah IBRAAHIM MAXAMED SALAAD, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba Ka fiyoow Cid I qasabtayna aysan jirin in aan ka libiyey kuna wareejiyay IJAABO MAXAMED C/RAXMAAN MAXAMED Dhul banaan oo tilmaamihiiisu sare ku xusan yahay, uuna ku qoran yahay Marxuum Maxamed Salaad Cabdi Aadan, Kuna gaday Warqad Dhaxalkoob iyo Wakaalad Ku Taariikhaysan 04/06/2024, Kana soo baxday Maxkamadda Degamada Afgooye, ayna Saxiixeen Gudoomiyaha Maxkamadda Drs, Maymuun Muuse Maxamed iyo Kaaliye Faysal Aweys Sh, Saciid, Iyo Wakaalad Gaar ah Ref:- 24316/24, Tr. 22/05/2024, Kana soo baxday Nootaayo Dayax, uuna Saxiixay Dr Aaden Jimcaale Maxamed, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yihiin rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah , Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Anigoo ah IJAABO MAXAMED C/RAXMAAN MAXAMED Ahna Iibisatada dhulkaan, Waxaan Caddeynayaa In aan Ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkiyada dhulkaan, Kuna qancay Heshiiskan

SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA AHNA ISKAIIBIYE

IBRAAHIM MAXAMED SALAAD

IBRAAHIM

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MAXAMUUD MAXAMED XASAN

SAXIIXA IIBSATADA DHULKA

IJAABO MAXAMED C/RAXMAAN MAXAMED

IJAABO

2- FARXAAN MAXAMED AADAN

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1047/T.P.N/24, Tr. 08/06/2024, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- Ibraahim Maxamed Salaad Ahna (Wakiilka Dhaxaltooyada ahna Iska iibiye), 2- Ijaabo Maxamed C/raxmaan Maxamed Ahna (Iibsato) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

[Signature]

MASAWIRKA W/K DHAXALTOYADA AHNA ISKA IIBIYAHA

MASAWIRKA IIBSATADA

IBRAAHIM MAXAMED SALAAD




IJAABO MAXAMED C/RAXMAAN MAXAMED



MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

MAXAMUUD MAXAMED XASAN



FARXAAN MAXAMED AADAN





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:-(HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNICIPALLE AH.)

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay Koowda Bisha Fabraayo, ee sanadka Labada kun toban & Shanta (01/02/2015.) Aniga Nootaaya Muqdisho Dr. Saciid Cali Cosoble waxaa Xafiiskeyga ku yaal S/Bakaaraha ee inta u dhaxaysa Shirk.D/shiil & Masjidka Abuu Hureyra iigu yimid iyaga oo soo heshiiyey ina weydiistey inaan u kala qoro heshiiskooda ujeeddada sare ku xusan dadka Soomaaliyeed ee hoos ku kala caddeynaya sidatan:-

1-) Aniga oo ah Sahro Cumar Axmed Nuur, Waxaan heshiiskan ku cadeynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyey kuna wareejiyay Maxamed Salaad Cabdi Aadan, Dhulkeyga Banaan ee ku yaal Gobalka Shabeelaha Hoose Deegaanka Jasiira ee Degmada (Afgooye) dhulkaas oo aan ku milkiyey W.M.L.56789/2014, Tr,26/11/2014, Kana soo baxday Nootaayo Muqdisho uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble, Dhulkaan oo Wareegiisu dhan yahay (20X40.M). Lotto.Lr. (8750,8751-G). Soohdintiisuna tahay Galbeed iyo Bari Jidad, inta kale dhul dad, Wuxuuna Wakiilka iibsaduhu dhulkaan iiga iibsaday lacag dhan USD. 4,000/\$. (Afar Kun oo Dollar oo aan Lacagtaasi Wada Qatay). Waxaan kale oo aan cadeynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo waxkasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee laxiriira isla dhulkaan Wixii taariikhda sare ka bilowdana xuquuqda milkiyadda Dhulkaani, Faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa Canshuureedba wuxuu u wareegay (Maxamed Salaad Cabdi Aadan).

2-) Aniga oo ah C/llaahi Maxamed Salaad, Ahna Wakiilka iibsadaha Lagu Magacaabo Maxamed Salaad Cabdi Aadan, Somali ah, Ku dhashay Bardere, Sanadkii 1936, Kii, Hooyadiisna la yiraahdo Xaliimo Maxamed aadan, Degan Xamar, Waxaan heshiiskan dhankeyga ku cadeynayaa in Sahro Cumar Axmed Nuur, igu wareejiyay dhulkaan afartiisa dhinac ee kala duwan oo waxba dhimaneyn lehna sifaha ay ku soo xustay aniguna aan u gudoomay iibsadaha una saxiixay kaalitiisa heshiiskan.

=SAXIIXA ISKA IIBISADA=
Sahro Cumar Axmed Nuur.

=SAXIIXA WAK/IIBSADAHAA=
C/llaahi Maxamed Salaad.

.....
= (SAXIIXYADA MARKHAATIYAASHA)=

.....
2-)C/raxmaan Cumar Axmed.

.....
Maxamuud Maxamed Kulmiye.

Rep.57163/2015. (CADDEYN TA NOOTAAYAHA.)

Tr.01/02/2015.

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble waxaan cadeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) Sahro Cumar Axmed Nuur, Somali ah, Hooyadeedna la yiraahdo Xaawo Xasan Shariif, ku dhalatay Xamar, Sanadkii 1964, Kii, Sidata Britain Passport NO.304642421, Ahna (iska iibiso). 3-) C/llaahi Maxamed Salaad, degan Xamar, Ahna (Wakiilka iibsadaha). iyo waliba Labada nin Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey, oo kor ku xusan. Dadkaan oo aan aniga aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskan ku kala qorteen igulana saxiixeen Xaafiiska, iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

By .Madaxey.



=NOOTAAYAHA=
(Dr. Saciid Cali Cosoble)

1) R.1047/T.P.2/24
← Tr. 08/06/24
20x20.M
L. 8750-G

2) R.1048/T.P.N/24
← Tr. 08/06/24
20x20.M
L. 8751-G



The Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of Inland Revenue Department

Ref: 950

11/2/2015.

Ku: Cida ay quseyso

=Muqdisho=

UJEEEDO: RUQSAD GADIDA HANTI MA GUURTO AH (NULLO OSTE”).

Mudane: Sahra cumar Ahmed

Tixraac arji ee Taariikh 11/2/2015

Waxaa la ruqseeyay gadida Hanti ma guurto ah ujeeddada ku xusan

Lamb 5689/2014 8750, 8751-G

Oo ku yaala Degmada AF Gooye (Jasiira)

Nooca Hantida dhul banaan

Cida laga gadaayo waa maxamed salad cabdi

Oiimuhuna waa \$ 4,000

Wada Shaqeyn Wacan

Binti Cali Maxamed

Maamulaha Canshuuraha Berriga ee Degmada Hawl Wadaag





Ref. no: M/D/AFGI/ 4097/2024

UJEEDDO: SUGITAAN DHAXALCOOB CADEYN TARIKO IYO WAKAALAD.

Afgooye Maanta Oo Ay Tariikhdu Tahay 04/06/2024 Waxaa Maxkamadda Horteeda Yimid Ibraahim Maxamed Salaad Wuxuu Maxkamdda Ka Codsaday in Loo Qoro Sugitaan Dhaxalkoob, Waxay Maxkamadda ka Dalabtay in uu Markhaatiyaal La Yimaado intaas ka Dib Waxaa Maxkamdda Hor Yimid Labada Markhaati Oo kala ah: -

1-)**FARXAAN MAXAMED AADAN** Somali ah, Ina Faadumo Warsame Cali, Ku Dhashay Galkacyo Sanadkii 1974, Sita Somali Passport Lr.P01444212

2-)**MAXAMUUD MAXAMED XASAN**, Somali ah, ina Faadumo Cabdi Cumar kuna dhashay Diinsoor, Sanadkii 1956, Sita Somali Passport Lr.P00816495

Waxayna Si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda ugu Cadeeyeen In uu Geeriyoday **MARXUUM MAXAMED SALAAD CABDI AADAN**, Kuna Geeriyoday Xamar 2018, Waxay Kalo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in Marxuumka Labadiis Waalid ay Ka geeri Hooreeyeen , Xaasna uusan Qabin, Wuxuuna Ifka ugu Tagay Oo Dhaxlaaya 2 Wiil Oo Kalla Ah:-

1. **Cabdullaahi Maxamed Salaad**, Jira 55 Sano Ahna Wiilkii Marxuumka.
2. **Ibraahim Maxamed Salaad**, Jira 57 Sano Ahna Wiilkii Marxuumka.

Waxay Kalo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan Jirin Cid kale Oo Marxuumka Dhaxlaysa Oo Nool Ama Geeriyootay Haday Noqon Lahayd Aasal Ama Farac

HANTIDA LAGA DHAXLAAYA MARXUUMKA

Sidoo Kale Labada Marag Waxay Maxkamadda Ka hor Cadeeyeen In **MARXUUM MAXAMED SALAAD CABDI AADAN** uu ka tagay Dhul Banaan Oo Ku Yaal Gobolka SH/Hoose Deegaanka Jaziira Ee Degmada Afgooye, Dhulkaas Oo Cabirkiisu Yahay, (20X40.M) lotto Lr. (8750,8751-G), Soohdintiisuna Tahay Galbeed iyo Bari Jidad, Inta kale Dhul Dad, lehna W.M.L Ref- Lr. 57163/2015, Tr:- 01/02/2015, Kana Soo Baxday Nootaayo Muqdisho Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble.

WAKAALAD


Waxay Maxkamadda Degmada Afgooye Sugaysa in Cabdullaahi Maxamed Salaad Uu Soo Wakiishay Walaalkiis **IBRAAHIM MAXAMED SALAAD** Sida Ku Cad Wakaalad Gaar ah Ref:- 24316/24 Tr: 22/05/2024 Kana Soo Baxaday Nootaayo Dayax Muqdisho Uuna Saxiixay Dr. Aadan Jimcaale Maxamed, Una Wakiishay Walalkiisa In uu U Maamuli Karo, Dhaxalkoob U Samayn Karo, Xafidi Karo, Gadi Karo, Wareejin Karo, Dhisi Karo, Kireyn Karo, ka Saari Karo, Saxiixi Karo Kaalintiisa, Una Doodi Karo, Una Dacwoon Karo, oo Qareen U qaban Karo, Maxkamadaha Dalka Hortooda Umatali Karo Qismi Dhaxaleedka Uu Ku Leeyahay **MARXUUM MAXAMED SALAAD CABDI AADAN**.

MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA

FARXAAN MAXAMED AADAN



MAXAMUUD MAXAMED XASAN



MASAWIRKA WAKIILKA DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA

IBRAAHIM MAXAMED SALAAD



SAXIIXA MARKHAATYASHA

1-FARXAAN MAXAMED AADAN

2-MAXAMUUD MAXAMED XASAN

FARXAAN

Mohamed

SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA

IBRAAHIM MAXAMED SALAAD

IBRAAHIM

SUGITAANKA MAXKAMADDA

Maxkamadda Degmada Afgooye Markay Aragtay Codsiga Wakiilka Dhaxaltooyada, Markay Maxkamadda Dhageesatay Labada Marag, Markay Maxkamadda Aragtay Wakaalada Sare Ku Xusan, Waxay Maxkamadda Dagmada Afgooye Sugeysaa geerida **MARXUUM MAXAMED SALAAD CABDI AADAN**. Ayna Dhaxalkiisana Leeyihiin Dadka Sare Ku Xusan oo kaliya, Waxay kalo Maxkamaddu Sugaysa in **Cabdullaahi Maxamed Salaad** uu Soo Wakiishtay **IBRAAHIM MAXAMED SALAAD** kana Mid ah Dhaxaltooyada uuna Awood Buuxda uu lee yahay Tasarufka Hantida ay Ka Dhaxlayn Marxuumka Sare ku Xusan, Waana Sugitaan Dhaxalkoob iyo Wakaalad Ansax ah Oo Waafaqsan Sharciga islaamka iyo qaanuunka Dalka u Degsan, Waxayna Maxkamadda Ku Qortay Diiwaanka Guud Ee Maxkamadda Degmada Afgooye Qeybta Macaamilaadka.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA

Drs: Maymuun Muuse Maxamed

=KAALIYAHA MAXKAMADDA=

Faysal Aweys Sh.Saciid



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA



DAYAH MOGADISHU NOTARY PUBLIC
DR' ADEN JUM'ALE MOHAMED
TEL:- 061-5189259 / 061-5191882



Rep. No.24316/24

Email: aadandayax243@gmail.com

ASAL

Ujeeddo:- WAKAALAD GAAR AH (SPECIAL REPRESENTATIVE)

Maanta oo taariikhdu tahay 22/05/2024, anigoo ah Notaayo Dr' Aadan Jimcaale Moxamed, oo Xafiis Notaayo ku Leh Jidka-30ka, ka soo horjeedka Masjid Salaama, waxaa Xafiiskaan iigu yimid dadka hoos ku qoran, ina weydiistay inaan u kala qoro heshiis ay dhaxdooda kasoo wada heshiiyeen, una qeexan sida soo socota:-

- 1) Anigoo ah ABDULLAHI MAHAMMED SALAAD, Somali ah, ku dhashay Muqdisho 01/02/1969-kii, Sita Norway Passport No.34249095, sawirkeeyguna ku daabacanyahay Aatadaan, oo ka Feyow Caqliga, Maskaxda, Qalbiga iyo Jirka oo idil, raalina ku ah bixinta wakaaladaan gaarka ah ee soo socota, ayaan waxaan qoraalkaan Xafiiska Nootaayaha Dayax hortisa ku caddeynayaa inaan si rasmi ah ugu wakiishay Walalkeey **IBRAHIM MOHAMED SALAD**, Somali ah, Ina Ambiyoo Cabdiwahab Muuse, Leh tel No.0615788347, ku dhashay Muqdisho 01/01/1967-Dii, Leh Passport No.P00918148, dagan **Yaaqshiid**, una wakiishay qeybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay dhulka uu ka geeriyooday Aabaheey Marxuum **MAXAMED SALAAD CABDI AADAN**, dhulkaas oo ku yaala Xamar Deg. **Afgooye**, Deegaanka Jasiira, Cabirkiisuna yahay (20X40-MT), **Lotto No.8750-8751-G**, Sohdintiisuna tahay Galbeed iyo Bari **Jidad**, inta kale dhulal dad, Leh Warqadda Beeca **Rep.57163/2015, Tr.01/02/2015**, kana soo Baxday Xafiiska Nootaayaha Muqdisho, uuna ku saxiixanyahay Dr.Saciid Cali Cosoble, hadaba waxaan si buuxda ugu wakiishay in uu ii gadi karo, Xafidi karo, dhisi karo, kireeyn karo, Xanaaneyn karo, ilaalin karo, u Doodi karo, Qareen iigu qaban karo haddii loo baahdo, igu Matali karo dhan kasta la iiga baahdo, iigana doodi karo maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karo waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karo kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman yahay in uu si buuxda u Maamulo dhulkaas leh tilmaamaha kor kusoo sheegay.
- 2) Sidaas awgeed, ciddii dan ka leh qeybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay dhulka laga dhaxlaayo Aabaheey marxuum **MAXAMED SALAAD CABDI AADAN**, waxey kala xiriiri karayaan u idmane **IBRAHIM MOHAMED SALAD**, iyadoo ay ka Marrag yihiin wakaaladaan dadka hoos ku Saxiixan aqoonsiyadooduna ku lifaaqanyihiin wakaladaan.
- 3) Aqbal: anigoo ah la wakiishe **IBRAHIM MOHAMED SALAD**, waxaan qoraalkaan isla Xafiiskaan hortisa ku caddeynayaa inaan aqbalay wakiilnimada uu i wakiishay Walalkeey **ABDULLAHI MAHAMMED SALAAD** oo aan u fulin doono sida uu illa balamay.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

Abdullahi Salaad

(A) ABDULLAHI MAHAMMED SALAAD

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

(B) IBRAHIM MOHAMED SALAD

SAXIIXA MARAGGA WAKAALADAAN

1. ALI MOHAMUD HASSAN

2. MOHAMED MOHAMUD MOHAMED

(Xafiiska Notaayaha Dayax Muqdisho)
(Notaayo Dr' Aadan Jimcaale Mohamed)



XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO: (HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNICIPALLE AH).

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay Lix iyo Labaatanka Bisha Novembar ee sanadka Labada kun toban & Afarta (26/11/2014.) Aniga Nootaaya Muqdisho Dr. Saciid Cali Cosoble waxaa Xafiiskeeyga kuyaal S/Bakaaraha ee inta u dhaxaysa Shirk.D/shiil & Masjidka Abuu Hureyra iigu yimid iyaga oo soo heshiiyey ina weydiistey inaan u kala qoro heshiiskooda ujeeddada sare ku xusan dadka Soomaaliyeed ee hoos ku kala caddeynaya sidatan:-

1-) Aniga oo ah Xasan Maxamed Jimcaale Calasoow, Waxaan heshiiskan ku cadeynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyey kuna wareejiyey Sahro Cumar Axmed Nuur, Dhulkeyga banaana ee ku Yaall Deegaanka Jasiira ee Degmada (Afgooye) oo aan ku milkiyay 1-) W.M.L.BB/ 03/05904/2014, Tr,09/10/2014, Cabirkiisu dhan yahay (40X40.M). Lotto Lr. (8750,8751,8752,8753-G) iyo 2-) W L.BB/ 03/05907/2014, Tr,09/10/2014, Cabirkiisuna yahay (20X20.M) Lotto Lr.(8754-G) Kana Soo baxeen D/hoose ee Afgooye, Soohdimihiisuna kala yihiin Bari, Galbeed iyo Waqooyi Jidad, Koofurna dhul dad, Waxeeyna iibsatadu Dhulkaan iiga iibsatay lacag dhan USD. 10,000/\$. (Toban Kun oo Dollar Oo aan acagtaas wada qaatey). Waxaan kale oo aan cadeynayaa in dhulkaan uu ka madax banaana yahay rahan quuq ama sheegasho cid kale iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla dhulkaan. Waxii taariikhda sare ka bilowdana Dhulkaan milkiyadiisa Faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa Canshuureedba wuxuu u wareegay (Sahro Cumar Axmed Nuur).

2-) Aniga oo ah Sahro Cumar Axmed Nuur, Waxaan heshiiskan dhankayga ku cadeynayaa in Xasan Maxamed Jimcaale Calasoow, iga iibiyay iguna wareejiyay afarta dhinac ee kala duwan ee Dhulkaan uu sare uga soo hadlay oo waxba dhimanayn lehna sifaha uu ku sheegay isla markaasna aan aniga ka gudoomay kuna qancay heshiiskan.

=SAXIIXA ISKA IIBIYAHAA=

Xasan Maxamed Jimcaale Calasoow.

=SAXIIXA IIBSATADA=

Sahro Cumar Axmed Nuur.

= (SAXIIXYADA MARKHAATIYAASHA)=

1-) Cumar Maxamed Samatar.

2-) Cabdi Gacal Warsame.

3-) Nuur Macalin C/laahi.

Rep. 56789/2014.

(**CADDEYN TA NOOTAAYAHA**)

Tr. 26/11/2014.

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble waxaan cadeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) Xasan Maxamed Jimcaale Calasoow, Soomaali ah, Ku dhashay Muqdisho, Sanadkii 1949, Kii, Hooyadiisna la yiraahdo isniino Maalin Shiikhoow, Sita Somali Passport Lr. P00117760, Ahna (iska iibiye) 2-) Sahro Cumar Axmed Nuur, Somali ah, Ku dhalatay Xamar, Sanadkii 1964, Kii, Hooyadeedna la yiraahdo Xaawo Xasan Shariif, Ahna (iibsate) iyo waliba Sadaxda nin ee Soomaliyed ee dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan. Dadkaani oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadas ayleeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska, iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

Beec

Rep: 57163/2015.

Tr: 01/02/2015.

W.D.H. (20x40-m)

lotto ir. (8750,
8751-a)

6

Beec

Rep: 57164/2015.

Tr: 01/02/2015

W.D.H. (20x20m)

lotto ir. (8753-a)

DOWLADDA HOOSE EE

Deg. Jasiira

40X80VAAXDA XISAABAADKA GUUD

8746.9	8751.9
8747.9	8752.9
8748.9	8753.9
8749.9	
8750.9	

BOLLETTA

N°

05904

160

Esercizio 2011

Articolo 4.2.2

Ricevo da Xassan Maxamed Jimcaale

Baqool iyo Lexdan Dastar

on ka soo Qashay Lacag Cabasho

Dhuc Jasiira

40X80

Dowladda Hoose Deg. Jasiira: 06/10/2011

IL CASSIERE



R-56788
W OH (40x40) - 4
Co 40 / 8746-8747-8748-8749
A0000
PA-26/11/2014

R-56789
W OH (40x40) - 4
Co 40 / 8750-8751-8752-8753
PA-26/11/2014

8



A

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XARUNTA MAAMULKA DAWLADDA HOOSE
EE DEGMADDA AFGOOYE
WAAXDA DHUL BIXINTA

Nº 45

Lr _____/20_____

Tr=09/10/2014

Bollettario: 03
Bolletta No: 0596t
Sanadka: 2014

WARQADDA MILKIYADDA DHULKA

UJEEDDO: DHUL DEEGAAN AH

Madane / Marwo Xassan Moxamed Jimcaale

Markii aan aragnay arjiga aad Xafiiskaan u soo Qoratay Taariikhdiisuna ay ahayd 07/10/2014

Kuna saabsan Boos Dhul deegaan ah oo aad dhisato ayaa waxaa lagu ogolaaday in lagu siiyo

Dhul dhan: 40 X 80 Magaalada: _____ Tuulada: Jasira

Lambarkiisuna yahay: 87469 87539 oo wareeg ah

SOHDINTA DHULKA

- A) Bari (_____)
- B) Waqooyi (_____)
- C) Galbeed (_____)
- D) Koofur (_____)

Dhulkaas lagu siiyay waxaa lagu ogolaaday oo kaliya inaad ku dhisato dhismo wanaagsan ama dar dha ah, Nooca dhismaha iyo naqshadda waa in uu ogolaadaa Madaxa Maamulka dhulbixinta Dowladda Hoose Afgooye, Waana in aad ku dhisato muddo 12 Bilood gudahood, laga hilaabo taariikhda dukumiintigaan siiyo.

DHULKA WAXAA LEH MAAMULKA DAWLADDA HOOSE


Xoghayaha Dawladda Hoose ee Afgooye

Gud. Hubinta Dhulka & Xafinta khila

[Signature]

[Signature]

A



R-56788

WOH(40X40) unit

Woh (8746-8747-8748-8749)

TA-26/11/2014

R-56789

WOH(40X40) unit

Woh (8750-8751-8752-8753-5)

TA-26/11/2014



FOOMKA BIXINTA DUKUMINTI ORJINAAL AH

REP.1047/TPN/2024

Tr,29/06/2024

Magaca qaadaha: →
Meeshuu deganyahay →

Jaabo Maxamed C/axmed Maxamed

Xaqshud Jankal

Telfoonkiisa: →

0613711747

Waxaan Cadeynyaaa Anigo
Maskaxdeedu Taam Tahay in
Xafiiska Nootaayo Tayo aan Ka
Qaatay Dukuminti Original +Aato
Refkiisu Sare ku Xusan Yahay.

SAXIIXA BIXIYAHA:

SAXIIXA QAADAHA:

Jaabo